

Tarbiyada ilmaha Zamanka Tiknoolajiyada

Dunida maanta oo aad oogu tira-batay adeegsiga aaladaha tiknoolajiyada sida iPad-yada, telefoonada casriga ah, waxaa muhiim ah in ay walidiinta hubiyaan in aaladahaas guriga loogu adeegsado si munaasab ah. In kasto oo ay haatan ardayda

dhigato dugsiga hoose aysan iPadka guriga u qaadanin, hadana hoos waxaa ku xusan fikarado ku saabsan qaabka ay qoysaska u bari karaan in ay ilmahooda mustaqbalka noqdaan kuwa tiknoolajiyada u adeegsado si mas'uulnimo ah.

Dajinta Hab-dhaqan ku haboon Adeegsiga Tiknoolajiyada



Maadaama aad tahay waalid, waxaad leedahay go'aanka saacadaha uu cunugaaga guriga ku isticmaalo aaladaha tiknoolajiyada sida iPadka.

Waxaa muhiim ah in **aad ilmahaaga hore ugu sii sheegtid una qayaxdid habka** aad rabtid in uu u adeegsado iPadka.

Barta **Common Sense Media** waxay qoysasku ka heli karaan talooyin ku saabsan qaabka ay u hubin lahaayeen in ilmahooda ay si aamin iyo mas'uulnimo leh internet-ka ugu adeegsan lahaayeen. Common Sense Media waxaad sidoo kale laga heli karaa heshiiska "**Media Family Agreement**". Heshiiska wuxuu leeyahay qodob dhowr ah oo lagu hagi kartid wada-hadalka ilmaha iyo waalidka ee ku saabsan qaabka haboon ee loo adeegsado tiknoolajiyada.

Si aad xog dheeraad ah u heshid booqo barta:

goo.gl/8SdPYk

- Qaabka loo bedelo **privacy settings** iyo **talooyin kale oo ku saabsan amniga internetka**
- U adeegsida **miidiyaha bulshada** (Social Media) si mas'uulnimo ah
- Qaabka lagu wajaho **qalalaasaha miidiyaha lagu dhex fuliyo**
- Qaanuunka **kormeerida saacadaha uu ilamaha shaashada hor fadhiyo** iyo sidoo kale qaabka loo sameeyo jadwal ku haboon da'da ilmaha.
- **Boggaga/baraha waxbarshada** ee imaha yaryar
- Maaraynta qaabka uu ilmaha u adeegsado **telefoonka gacanta**

Soo-roogashada Apps-yada

Inta aysan so rogan app, qoysasku waa in ay hubiyaan in app-ku yahay mid:

- Lacag la'aan ah sido kalena aanan laheyn xayeysiimo
- Ku haboon da'da uu ilmahoodu jiro
- Leh tusaalooyin iyo macluumaadka ilmaha
- Mid waxbarasho; hubi in aap-ka yahay mid horumarinayo:
 - ✓ Hal-abuurnimo iyo qiyaas
 - ✓ Iskaashi iyo fikrad wadaag
 - ✓ Xalinta mashaakilaadka iyo Maskax ka shaqeysiin

Wixii faah faahin dheeraad ah fiiri **Buugga Tasmada iPad-ka iyo Macluumaadka Waalidka:**

www.spps.org/personalizedlearning

Tirada (apps) apps-ka ah ee la'ansixiyay, booqo dukaanka deqmada ee adeeqa iskaaca ah:

www.spps.org/personalizedlearning

Xadidda Internet-ka Guriga

Qoysaska haysta khad wireless ah waxay isticmaalka internetka ee ilmahooda ku xadidi karaan in ay soo rogtaan **sofwear khaas ah oo loogu talo galay in uu reebo galida baraha aan haboonayn.**

- Fur barta **OpenDNS Home** iyo **Family Shield** oo aad lacag la'aan ka soo rogan kartid barta: www.opendns.com
- Sidoo kale barmaamijka **SafeEyes** ayaad ka gadan kartaa meelo badan; internet-ka ka raadi "SafeEyes" si aad ugu heshid qiimo munaasab ah
- Barmaamijka **NetNanny** ayaad ka iibsan kartaa barta www.netnanny.com
- **Shirkadaha telefontada iyo kuwa adeegyada sida kebalka** ayaad iyana ka heli kartaa xalka xadida internetka guriga. Ka ogoow shirkadahaas in ay hayaan adeegyadaas.